Ujeeddada siyaasadda Mushahar bixinta iyo qaabaynta darajooyinku waa in la dejiyo habraacyo iyo xeerar cad oo lagu maamulayo horumarinta mushaharka iyo dib-u-habaynta darajooyinka, iyada oo la hiigsanayo sinnaan- ta mushaharka iyo daah-furnaanta. Taasina waxa ay aasaas u tahay dib-u-habeyn ballaadhan oo lagu sameeyo shaqaalaha dawladda. Tallaabadan ayaa ah mid lagu gaadhayo adeeg hufan, bulshadana waxtar u leh.

Intii u dhaxaysay sannadihii 2003 ilaa 2022, dawladda Somaliland waxa ay si hagar la'aan ah ugu hawlanayd sidii ay is beddel ugu samayn lahayd shaqaalaha dawladda. Dhaqangelinta siyaasaddan cusub waxa laga filan karaa in si caddaalad ah oo isu dheelli tiran loo maamulo mushaharaadka, iyada oo la xaqiijinayo in shaqaalaha dawladda sida ugu habboon loo aqoonsado, laguna abaalmariyo wax-qabadkooda.

Xukuumadda waxa ka go'an hirgelinta siyaasaddan, taas oo daliil u ah sida ay ugu heellan tahay maamul wanaagga iyo abuurista jawi shaqo oo wanaagsan, kaas oo dhiirrigelinaya shaqaalaha dawladda.

Doorka ay muwaadiniintu ku leeyihiin hirgelinta siyaasaddan ayaa ah in ay aqbalaan is baddallada ay keento dib u habayntani si aynu uga faa'iidayanno fursadaha soo baxa, qaybna uga noqono dhisidda Somaliland ka horumarsan tan maanta.

Ugu dambayn, waxa aan rajaynayaa in hirgelinta siyaasaddani ay saamayn togan ku yeelato geeddi socodka dib u habaynta shaqaalaha dawladda. Tani waa tallaabo muhiim ah oo lagu xaqiijinayo helintaanka adeeg bulsho oo hufan kuna dhisan sinnaan iyo caddaalad. Waxa aan idinku dhiirri gelinayaa in aad qayb ka noqotaan isbeddellada socda.

Allaa Mahad leh

Cabdi Aadan Diiriye
Maareeyaha Mashruuca



Farriinta GUDDOOMIYAHA

Guulo badan baa inoo soo socda !

Sannadkan wax qorshaysan isla markaana aanu awoodda saaraynaa xaqiijinta laba himilo oo guul wayn u ah qaranka. Waxa aanu awooddayada isugu gaynaynaa ansixinta Xeerka iyo Siyaasadda Hawl-gabka shaqaalaha dawladda iyo sidoo kale dhamaystirta iyo ansixinta Siyaasadda Mushahar Bixinta iyo Qaabaynta Darajooyinka Shaqaalaha Dawladda. Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay si aan gaabsi lahayn uga shaqaynayaa in qorshayaashaas iyo hadafyadaasi noqdaan qaar la xaqiijiyo, iyada oo mustaqbal ku dhisan caddaalad, isla markaana dhidibbo adag ku taagan loo samaynayo shaqaalaha dawladda iyo ehelkoodaba. Haddii wakhti badan iyo dadaal dheeraad ah la geliyana waxa aan aaminsanahay in taas la xaqiijin karo inta aanuu sannadku dhamaan.

Madaxda Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo kaashanaysa khubaro ku takhasusay arrimahan ayaa in muddo ahba ka shaqaynayay curinta siyaasadahan oo ku salaysan heerarka caalamiga ah. Waxa aanu si buuxda u fahansannahay muhiimadda ay siyaasadahani u leeyihiin qaranka, iyaga oo badbaado dhaqaale u abuuraya shaqaalaha dawladda ee dalkani leeyahay. Iyada oo mar walba ay jiraan caqabado, waxa aanu mar walba ku taagnaanaynaa dariiqa saxda ah ee aanu ku xaqiijinayno hadafkayaga. Waxa aanu mar walba ku tiirsannahay shaqalahayaga khibradda leh, sidoo kalena waxa aanu sii wadi doonaa in aanu ku dhiirri gelino hadafkayaga ah in la helo

shaqaale dawladeed oo tayo iyo xirfad ahaanba sarreeya.

Si haddaba aanu arrintan u xaqiijinno, waxa aanu kulamo kala gaar gaar ah la galnay qaar ka mid ah Wasiirrada iyo madaxda kale ee dawladda si aanu sharraxaad uga siino nuxurka siyaasadahan, sidoo kalena aanu u dhegeysanno ra'yigooda iyo soo jeedintoodaba.

Sidoo kale, dhamaadka bisha June 2023, waxa aanu dib u eegis ku samayn doonaa qorshihii hawl-qabadka ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ee sannadka 2023 maadaama kala badh uu tegey. Waxa aanu dib u eegistaa uga faa'idaysan doonaa in aanu eegno wixii qabsoomay, wixii aan qabsoomin, caqabadaha jira iyo sidii loo fulin lahaa hawlaha qorshaysan inta aanuu sannadku dhamaanin. Maamulka Hay'adda Shaqaaluhu waxa ay ku mashquulsan yihiin sidii shirkaasi u qabsoomi lahaa iyo diyaarinta warbixinnada loo baahan yahay, waxaanan ku kalsoonahay in wax badani qabsoomeen qaybtii hore ee sannadkan.

Ku soo dhawaada cadadka cusub ee Majallada Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ee April ilaa June 2023.

Khalid Jama

KHAALID JAAMAC QODAX

Guddoomiyaha
Hay'adda Shaqaalaha Dawladda

Falalka ay ka Dhalan Karaan

Anshaxmarinta Shaqaalaha Dawladda ee

Waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda

Sida ku cad Xeerka shaqaalaha dawladda Qodabkiisa 3aad farqadahiisa 2 & 3aad oo tilmaamaya in mid kamid ah ujeedooyinka xeerka loo aasaasay ay tahay in lagu maamulo shaqaalaha dawladda.

Falalka Shaqaale lagu anshaxmarin karo waxay noqon kartaa laba nooc:-

1. Nooca 1aad waa inuu qofka shaqaalaha ahi lab iyo dhedig kuu doonaba haahaadee uugudanwaayo/ wayso waajib saarnaa sida ku cad qodabka 6aad ee xeerka shaqaalaha dawladda Xeer Lr.97/2022.
2. Nooca 2aad waa inuu qofka shaqaalaha ahi lab iyo dhedig kuu doonaba haahaadee uu la yimaado/ timaado ficil laga reebay oo ay mamnuuc ay tahay inuu sameeyo sida lagu caddeeyay qodabka 8aad ee xeerka shaqaalaha dawladda Xeer Lr.97/2022.

Haddaba, aynu si yar oo kooban u dul istaagno Waajibaadka saaran shaqaalaha dawladda ee qodabka kor ku xusani ku waajib yeelay.

Qodabka 6aad waxa uu ku waajib yeelay shaqaalaha dawladda waajibaadkan soo socda:-

1. Qof kasta oo Shaqaale ahi waxa waajib ku ah Inuu u guto waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan xeerkan, xeer-nidaamiyayaasha ka dheegma iyo xeerarka kale ee si uun u khu-seeya;
2. Inuu u hogaansamo xeerarka dalka oo ugu horeeyo Shareecada Islaamka iyo Dastuurka JSL ee lagu maamulayo shaqada Hay'addiisa/ Wasaaraddiisa;
3. Inaanu ka hor imanin awaamiirta shaqo ee waafaqsan xeerka shaqaalaha dawladda;
4. Hadii ergis shaqo looga baahdo qofka shaqaalaha ahi waa in uu u guto waajibaadkiisa shaqo ee jagadaa cusub ee loo igmaday si waafaqsan xeerarka iyo awaamiirta Madaxa hay'adaas dawladeed ee ergiska uu kula joogo.

5. Inuu dhawro Saacadaha shaqada haddii aanay jirin duruufo u diidaya ama aanu ku jirin fasax sharciya;
6. In uu u tixgaliyo in ay tahay mid sir ah oo dhawrsoon macluumaadka uu shaqada uu hayo awgeed ku helay;
7. Inaanu ku kicin fal takoor ah marka uu ku gudo jira Gudashada waajibaadkiisa shaqo;
8. In uu Ilaaliyo isla markaana xafido xogta hay'addiisa iyo hawlaha uu gacanta ku hayo, sidoo kalana aanu u gudbin xogtaasi cid kale, hadii aanay xil-gudashada waajibka shaqo ama baahida cadaaladeed aanay dhigayn sidaa si ka duwan;
9. In uu Ka fogaado in uu raadiyo ama gudoomo hadiyado faa'iido shaqsi ah leh, ama faa'iido u ah isaga ama iyada qoyskiisa ama qoyskeeda ama xafiis kaas oo uu ku xidhan yahay, taas badalkeedana lagu helayo is afgarad maamul ama hanaan kale oo isaga dani ugu jirto;
10. In uu Daryeelo hantida dawladeed ee uu masuulka ka yahay, isla markaana aanu u adeegsan hantida dadwaynaha ee lagu aaminay dan shakhsi ahaaneed ama hawlo kale oo sharci darro ah;
11. In aanu qaban isla markaana Ku mushahar qaadan wakhti isku mid ah in ka badan hal jago oo mushahar joogto ah lagu siiyo oo xafiis dawladeed ah.
12. In aanu qaban isla markaana ku mushahar qaadan wakhti isku mid ah shaqada dawlada iyo shaqo kale ha noqoto mid joogto ah ama mid kumeelgadha oo hay'addaha aan dawliga ahayn;

13. In uu ku dhaqmo waajibaadyada ay dhigayaan xeerarka dalka iyo siyaasadaha laxidhiidha shaqada hay'addiisa isaga oo dhawraya danta guud.
14. In aanu u isticmaalin xilka uu hayo/ hayso majoro habaabinta bulshada iyo faafinta xog isagoo isticmaalaya qalabka warbaahinta noocyadiisa oo dhan iyo gudbinta rayi cabir kii-sa kaas oo ka horimanaya xeerarka shaqaalaha, loola jeedo dano shaqsi, cid lagu sumcad dilayo ama lala xidhiidhin karo ujeedo siyaasadeed.
15. Sidoo kale, Xeerka shaqaalaha dawladda waxa uu shaqaalaha ka reebay ficilo aad u tiro badan oo ku cad qodabka 8aad Kuwaas oo lidi ku ah danta dadka iyo dalkaba.



Sidoo kale, Xeerka shaqaalaha dawladda waxa uu shaqaalaha ka reebay ficilo aad u tiro badan oo ku cad qodabka 8aad Kuwaas oo lidi ku ah danta dadka iyo dalkaba.

Ficiladaas laga reebay waxa kamid ah kuwan:-

1. Qofka shaqaalaha ahi waa inaanu ku lug yeelan hawl kasta oo aan waa-faqsanayn ama caqabad ku ah waa-jibaadkiisa shaqo ee Hay'addiisa/Wa-saaraddisa;
2. Inaanu xil ka qaban ama uu xubin ka noqon xisbi siyaasadeed ama dh-aqdaqaaq siyaasadeed ama aanu ku milmin arrimaha Siyaasadda;
3. Inaanu ku lug yeelan fulinta haw-lo-shaqo oo ay dhici karto in ay keenaan is-diidooyin daneed oo la xidhiidha gudashada waajibaadkiisa shaqo ee sarkaalka isagoo isticmaaya awoodiisa sarkaalnimo;
4. In uu qabto wakhtiga saacaddaha shaqada shaqo kale oo xirfadeed ama ganacsi oo ka baxsan midda dawladda ee uu hayo;
5. In uu ku kaco arrimo xataayo ama musuqmaasuq la xidhiidha;
6. In uu bixiyo/baahiyo ama uu sabab u noqdo bixinta/baahinta sirta hay'ada-ha dawlada isaga oo aan u haysan ogolaansho sharci ah ama ayna jirin amar maxkamadeed oo arintaasi khuseeya.
7. In uu fagaare dadwayne ka sheego ama uu warbaahinta siiyo wax ku saabsan siyaasadda dawladda ee ar-rimaha khuseeya amniga iyo difaaca Qaranka, isaga oo aan u haysan ogo-laansh sharci ah,

8. In aanu bixin ama sabab u noqon in la bixiyo sirta dawladda ee laga yaa-bo in uu shaqada uu hayo awgeed ku helay ama ku ogaaday; iyo
9. In aanu takoor iyo faquuq ku samayn dadweynaha uu u adeegayo.

Waajibaadkaas saaran shaqaalaha dawladda waa inay u gutaan si xilkasnimo iyo wadaniyad ku dheehan tahay si loogu abaalmariyo; balse Hadii uu jabiyo mid kamid ah Waajibaadkaas loo xilsaaray waxa ka dhalanaya anshaxmarin loo raacayo xeerka shaqaalaha dawladda sida uu tilmaamay qodabada 51-57 ee Xeerka shaqaalaha dawladda.

Sidaa si lamid ah, qofka shaqaalaha ah ee ka waantoobi waayo Ficilada laga mamnuucay samayntooda ka dhala-naya anshaxmarin loo raacayo xeerka shaqaalaha dawladda sida uu tilmaamay qodabada 51-57 ee Xeerka shaqaalaha dawladda.

La soco..... Tallaabooyinka ka dhala-naya ficilada shaqaalaha lagu anshax-marinayo.

Shirka Arrimaha Siyaasadaha iyo Hab-Raacyada Maamulka Shaqaalaha Dawladda



Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa saaka guddoomiyay kulan-hawleed ay ka soo qaybgaleen dhamaan agaasime waaxeedyada Haya'adda Shaqaalaha Dawladda.

Kulankan oo qayb ka ah kulamo joogto ah oo looga gol leeyahay dardar gelinta hawlaha shaqo ee Hay'adda Shaqaalaha ayaa waxa diiradda lagu saaray dib u eegista iyo qiimaynta halka ay marayso hirgelinta 16 ka siyaasadood iyo habraac ee maamulka shaqaalaha dawladda. Guddoomiyaha ayaa sheegay in fulinta siyaasadahaas iyo habraacyadaasi ay aasaas u yihiin dardar gelinta hawlaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo kor u qaadista tayada maamulka shaqaalaha dawladda. Waxa halkaa laga soo jeediyay qiimayn laga sameeyay halka ay marayaan siyaasada-haasi iyada oo mid mid la isu dul taagay si gaar ahna looga dooday heer fulineed ee siyaasad iyo habraac kasta iyo arrimaha la xidhiidha.

Waxa kale oo halkaa lagu lafaguray Arrimaha la xidhiidha is waafajinta xeerka shaqaalaha dawladda iyo siyaasadahaas.

Ugu dambayn waxa la isla qaatay in waax waliba dib ugu noqoto siyaasadda iyo habraaca khuseeya, isla markaana qiimayn rasmi ah laga soo sameeyo dhamaan wa-saaradaha iyo hay'adaha dawladda, iyada oo wixii soo jeedin iyo talooyin ahna halkaa lagu lafa guri doono. Shirka waxa sidoo kale goobjoog ka ahaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

Hab-raacyada maamulku waa hagaha shaqaalaha dawladda!

SUCCESS STORY

KAADHKA AQOONSIGA SHAQAALAH DAWLADDA EE CUSUB

“

Card Kanu wuxuu kuu ogolaanayaa inaad ku gashid goobaha xasaasiga ah sida wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee xogaha lagu kaydiyo.

Mr. Mire

”

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxay hirgelisay kaadhka aqoonsiga shaqaalaha dawladda oo la cusboonaysiiyey.

Kaadhkan cusubi waxa uu shaqaalaha dawladda u sahlayaa xoojinta ammaanka gelintaanka goobaha shaqo ee dawladda iyo bixinta adeegyadaba. Shaqaalaha dawladda ayaa iyaguna si wayn u soo dhaweeyey horumarinta lagu sameeyey kaadhadhkan cusub. Waxa xusid mudan in tallaabadani ay muujinayso horumarka loo qaaday adeegsiga tiknoolajiyada casriga ah kaas oo wax wayn ka tari doona horumarinta shaqada iyo shaqaalaha dawladda.

Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, Mudane Khaalid Mire oo ka hadlay kaadhadhka cusub ee shaqaalaha dawladda ayaa ku nuux-nuux saday muhiimadda ay leeyihiin kaadhadhka cusubi. “kaadhkan cusubi waxa ay gacan ka gaysanayaan hubinta xaaladda shaqo ee shaqaalaha dawladda, gelintaanka xarumaha shaqo iyo arrimaha la xidhiidha cashuurta shaqaalaha”.

Kaadhadhkii hore ee la bixiyey 2018-kii oo muddadoodu ahayd 5 sanno ayaa sanadkan dhacay. Sidaas darteed, Hay'adda Shaqaaluhu waxa ay qaybisay kaadhadhkan cusub oo dib u habayn iyo casriyeyn lagu sameeyey, taas oo lagu saleeyey khibradii laga bartay kaadhadhkii hore.

“Kaadhadhka cusub waxa lagu xoojiyey nidaam casri ah kaas oo lagu geli karo dhismayaasha dawladda iyo goobaha xasaasiga ah ee xogta lagu kaydiyo. Waxa kale oo ay gacan ka gaysan karaan ilaalinta macluumaadka xasaasiga ah ee ku kaydsan xog-kaydiyayaasha shaqaalaha dawladda, taas oo shaqaalaha loo ogol yahay oo keli ahi ay geli karaan iyaga oo adeegsanaya kaadhadhka shaqaalaha. Tani waxay saamaxaysaa in lala socdo shaqaalaha galaya qolka kaydka xogta si looga ilaaliyo in ay gasho cid aan loo ogolayni” ayuu yidhi Agaasimuhu.

“

ID-ku waa Kaadhka waa aqoonsiga koowaad ee shaqaalaha dawladda.

”

Kaadhkan cusub oo ay shaqaaluhu aad u soo dhaweeyeen ayaa shaqaalaha u leh faa'iidooyin kale oo ka duwan kuwa aynu hore u soo sheegnay, iyaga oo ku heli kara qiimo dhimis la xidhiidha adeegyada daryeelka caafimaadka iyo qaadashada baasaboorka Somaliland.

Hay'adda shaqaalaha dawladda ayaa dedaal badan ku bixisay casriyeynta iyo horumarinta kaadhadhka cusub, taas oo markhaati ka ah horumarka ay Somaliland ku tallaabsatay gaar ahaan dhinaca horumarinta shaqaalaha dawladda. Kaadhadhkan oo la adkeeyey hannaankooda ammaanka iyo habraacyada lagu maamulayo ayaa qayb ka ah ka faa'iidaydiga tiknoolajiyada casriga ah ee ay Somaliland hiigsanayso.

WARBIXIN KOOBAN

Imtixaannadii Shaqaalaha Wasaaradda Caafimaadka

UJEEDDOOYINKA IMTIXAANAADKA

- Hirgalinta xeerka shaqaalaha dawladda
- Diyaarinta qorshaha tartanka daahfurnaanta ah ee shaqooyinka ka bannaaday
- Xaqiijinta xogta shaqaalaha ku-meel-gaadhka ah
- Diyaarinta liistadda guulaystayaasha
- Diyaarinta natijada tartamayaasha.

Hay'adda Shaqaalaha dawladda oo fulinaysa xeerka shaqaalaha xeer Ir.97/2022 iyo habraacyada shaqaalaysiintu waxa ay hubin ku samaysay 261 fursado shaqo oo isugu jira 206 shaqo oo ay u tartamayeen shaqaalaha ku-meel-gaadhka ah ee heerka aqoontoodu ugu hoosayso shahaadada diploma, halka 55 shaqaale hoosaad ah qiimayn lagu sameeyey iyadda oo loo raacay nidaam xeerku jideeyey.

Haddaba kaalmahan shaqo ayay hay'adda shaqaalaha dawladdu u qorshaysay in loo jajabiyo dhammaan goobaha caafimaad ee gobollada iyo degmooyinka dalka si loo wada gaadhsiyo tirada Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka ugu jirta miisaaniyadda qaranka ee sanadka.

1.1 Gobolka Awdal

26 Diisambar 2022, waxa ay Saraakiisha hay'adda shaqaaluhu hubin ka bi-lawday Gobolka Awdal 37 kaalin shaqo, oo kala ahaa 31 kaalmood oo shaqaalaha caafimaadka ah iyo 6 kaalmood oo shaqaale hoosaad ah. Hubintaas ka dib, waxa ka soo baxday in 348 shaqaale ku-meel ahi u tartameen 31-kaas kaalmood ee loo tartamayey, kuwaas oo hay'adda shaqaaluhu ay ka qaaday imtixaan.



1.2 Gobolka Saaxil

1 January, 2023 waxa ay Saraakiisha Hay'adda shaqaalu ka bilaabeen hubinta 148 shaqaale ku-meel gaadh ah oo ka hawlgala Gobolka Saaxil. Waxaana loo tartameyey 25 kaalmood oo kala ahaa, 21 kaalmood oo heerka aqooneed ah iyo 4 shaqo oo shaqaale hoosaad ah. Hubintaas ka dib, waxa imtixaan laga qaaday tartamayaashii.



1.3 Gobolka Togdheer

3 Jeenawari 2023 ayay saraakiisha Hay'adda shaqaalaha dawladdu ka bilaabeen hubinta shaqaalaha ka hawlgala gobolka Togdheer, kuwaas oo tiradoodu dhamayd 448 shaqaale ku meel gaadh ah, kuwaas oo u tartamayay 44 kaalmood oo kala ahaa 35 kaalmood oo ah heerka aqooneed iyo 9 kaalmood shaqaale hoosaad ah. Hubintaas ka dib, waxa imtixaan laga qaaday tartamayaashii.



1.4 Gobolka Sanaag

5 Jeenawari ee 2023 saraakiisha Hay'adda shaqaalaha dawladdu ka bilaabeen hubinta shaqaalaha ka hawlgala gobolka Sanaag, kuwaas oo tiradoodu dhamayd 282 shaqaale ku meel gaadh ah, kuwaas oo u tartamayay 40 kaalmood oo kala ah 30 kaalmood oo ah heerka aqooneed iyo 6 kaalmood oo shaqaale hoosaad ah. Hubintaas ka dib, waxa imtixaan laga qaaday tartamayaashii.

Maxsuulka Guulaystayaasha

Hay'adda Shaqaalaha Dawlaadu waxa ay ka qabatay afar gobol oo kala ah Awdal, Togdheer, Saaxil iyo Sanaag imtixaanno daahfuran oo ay si caddaalad ah ay uga qaaday shaqaalihii ku meel-gaadhka ahaa ee wasaaradda Horumarinta Caafimaadka, oo tiradoodu guud ahaan dhamayd 1,226.

Waxa xusid mudan in wadarta guud ee guulaystayaasha afartaas gobol oo ahaa 123 guulayste, 63 ka mid ahi ay ahaayeen gabdho, halka 60 ay ahaayeen wiilal. Taas oo muujinaysa in markii ugu horeysay gabdhuhu ay kaga bateen wiilasha tartanka daaha furan.



Guulaystayaasha Gobolka Togdheer



Muhiimadda

CAAFIMAADKA iyo

BADBAADADA

ee Goobaha Shaqo

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyada oo qaranka uga masuul ah maamulka shaqaalaha dawladda waxa ay si joogto ah ugu hawlan tahay horumarinta iyo bedqabka shaqaalaha dawladda iyo goobaha shaqada. Taasi-na waxa ay qayb ka tahay abuurista jawi nabdoon oo ku haboon shaqada.

Hirgelinta Caafimaadka Iyo Badbaadada Goobta Shaqadu keliya kuma koobna in la ilaaliyo caafimaadka shaqaalaha iyo bedqabka goobaha shaqo, laakiin waxa ay qayb ka tahay kor u qaadista tayada shaqo iyo adeegyada ay bixiyaan shaqaalaha dawladdu. Si taas loo xaqiijiyo waa in la yareeyo shilalka, dhaawacyada iyo xanuunnada shaqaalaha ka soo gaadha goobaha shaqo. Taasina waxa ay kor u qaadaysaa isku xidhnaanta, kalsoonida iyo wada shaqaynta shaqaalaha dawladda.

Marka ay shaqaaluhu dareemaan caafimaad qab iyo in ay ku shaqaynayaan goob ammaankeedu sugan yahay waxa ay si wayn uga qayb qaadataa dhiirrigelintooda iyo ku qanacsanaanta shaqada. Waxa kale oo ay horseeddaa bixinta adeeg bulsho oo hufan.

Taasina waa hadafka guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, iyada oo isla markaana kor u qaadaysa sumcadda Hay'adda Shaqaalaha iyo hawladeennadeedaba.

Waxa aanu qabanaynaa aqoon-is-weydaarsiyo, tababarro, wacyi-gelin iyo shirar looga gol leeyahay in kor loogu qaado aqoonta shaqaalaha dawladda ee caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada. Waxa kale oo aan samaynaynaa kormeerro joogto ah oo lagu hubinayo hirgelinta xeerarka iyo siyaasada ee caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada si loo xaqiijiyo in goobaha shaqo ay yihiin qaar caafimaad ahaan iyo amni ahaanba ku habboon in lagu shaqayn karo.

**Xeerarka
badbaadadu
waa agabkaaga
ugu mudan**

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay ku hawlan tahay kor u qaadista caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada ee shaqaalaha dawladda iyada oo curinaysa siyaasado iyo habraacyo la xidhiidha caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada kuwaas oo lagu dhaqayo dhammaan xarumaha shaqaalaha dawladda.

Shir Lagaga Hadlayo Caymiska iyo Adeeg Caafimaad oo jaban oo ay yeeshaan Shaqaalaha Dawladdu



Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa guddoomiyey shir ay isugu yimaadeen Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku Xigeenka Hay'adda Caymiska Qaranka kuna wehelinayeen Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha iyo Agaasimaha Mac-hadka Tababarka Shaqaalaha Dawladda iyo saraakiil kale oo ka tirsan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

Shirkan ayaa lagaga hadlayay sidii shaqaalaha dawladda loogu heli lahaa Caymis jaban iyo adeegyo Caafimaad oo qiimahoodu hooseeyo dalka oo dhan. Madaxda shirkan ka qayb gashay ayaa halkaa ku lafaguray samaynta nidaam ku habboon oo shaqaalaha dawladda iyo eheladooduba ay ku heli lahaayeen adeegyo caafimaad oo jaban iyo caymis.

Hawshan ayaa waxa si wada jir ah uga wada shaqayn doona Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo Hay'adda Caymiska Qaranka, iyaga oo isla qaatay in la dejiyo istiraatiyaddii hawshaas lagu hirgelin lahaa mustaqbalka dhow, isla markaana la joogteeyo shirarka noocan ah si dhamaystirka hawshani u noqdo mid taabbo qaada.



QORSHAYNTA
CAYMISKA
SHAQAALAH
DAWLADDU
WAA MUHIIM.



Hay'adda caymiska qaranka somaliland waxa ay u socotaa in kharash tacah iyo dhibaato idin dul saaran aanu idinka dul qaadno

GULED MUSE GALAL



Waxqabadka Guud Ee Maamulka

MAALIYADDA

MASHAARIICDA (EAFS)

Xafiiska maamulka maaliyadda mashaariicda oo ka tirsan xafiiska xisaabayaha guud ee qaranka waxa loo igmaday in uu maamulo maaliyadda mashaariicda ay bixiyaan deeq bixiyayaashu ee kala shaqeeyaan dawladda Somaliland. Waxa loogu talo galay in uu xaqiijiyo in lacagahaa mashaariicda loo isticmaalay sidii loogu talo galay, iyaga oo awood u leh in ay hubiyaan, baadhaan, isla markaana ay sii daayaan qarashaadkaas iyaga oo adeegsanaya nidaamka maaliyadeed ee dalka u dejisan. Taasi-na waxa ay xaqiijinaysaa lahaanshaha, daah-furnaanta, isla xisaabtanka, xidhiidhinta mashaariicda, kor u qaadista tayada shaqaalaha iyo arrimo kale oo la xidhiidha.

Xafiiskani waxa uu muhiim u yahay xaqiijinta maamul wanaagga iyo in lacagaha mashaariicda loo adeegsado sidii loogu talo galay, gaar ahaan mashaariicda Baanka Adduunka.

“*Isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta hantida dadwaynuhu Waa laga huraan*”

Waxqabadka Xafiiska Maamulka Maaliyadda Mashaariicdu intii uu jiray waxa ka mid ah:

- Samaynta hannaan lagu hubiyo bixinta lacagaha kaas oo ay ka wada shaqeeyeen Baanka Adduunka.
- Xafiiska waxa lagu qaabeeyey samaynta qaybo cusub oo ay ka mid yihiin maamulka khataraha, fulinta hab-raacyada iyo Xakamaynta Gudaaha.
- Diyaarinta warbixinta billaha ah ee kharashaadka si looga saaro xisaabaadka looguna shubo xisaabaadka u gaar ah mashruuca.
- Diyaarinta warbixin maaliyadeedka hanti-dhowrka kuwaas oo loo gudbiyey Baanka Adduunka.
- Diyaarinta warbixin maaliyadeedka sannadlaha ah ee 2016 – 2022 iyada oo la raacayo xeerka maaliyadda Somaliland iyo xeerarka caalamiga ah ee lagu maamulo maaliyadda dawladda, kuwaas oo loo gudbiyey xafiiska xisaabayaha guud ee qaranka.
- Waxa hanti-dhawr la galiyey dhammaan mashaariicda intii u dhaxaysay sannadihii 2016 – 2022 kuwaas oo laga diyaariyey warbixinno.
- Shaqada fiican ee uu xafiisku qabtay darteed, Baanka Adduunka waxa uu kalsooni u muujiyey nidaamka maaliyadeed ee dalka, taas darteedna wixii ka danbeeyey sannadkii 2018 uu xafiiska xisaabayaha guud ee qaranku uu keligii si madax-bannaan hanti-dhawr ugu sameeyey mashaariicda isaga oo aan wax gacan siin ah ka helin cid kale oo caalami ah.
- Daneeyayaasha xafiiska maamulka maaliyadda mashaariicda oo ka mid yihiin maamulka mashaariicda, wasaaraddaha iyo hay'adaha dawladda iyo Baanka Adduunka ayaa muujiyey sida ay ugu qanacsan yihiin shaqada xafiiska iyo adeegyada uu bixiyaba.
- Shaqaalaha xafiiska maamulka maaliyadda mashaariicdu waxa ay qateen tababarro la xidhiidha maamulka maaliyadda, kharashaadka, iibka iyo maamulka mashaariicda kuwaas oo uu bixiyey Baanka Adduunka. Aqoontaasina waa mid u hadhaysa dawladda maadaama shaqaalahaasi ay ka tirsan yihiin shaqaalaha dawladda.

Xafiiska maamulka maaliyadda mashaariicdu waxa uu horumar la taaban karo ka sameeyey maamulka maaliyadda mashaariicda iyo qaabka loo isticmaalayo lacagaha deeq bixiyayaasha. Taasna waxa ka qayb qaatay isu-dheelitirka siyaasadaha shaqo, hab-raacyada,

xakamaynta gudaha iyo kor u qaadista tayada shaqaalaha. Sidoo kale, warbixinaha maaliyadeed ayaa lagu gudbiyey xilligii loogu talo galay iyada oo la raacayo hannaanku deeq-bixiyayaashu ugu talo galeen.

Shirka Lagaga Hadlayo Qabyo-qoraalka Siyaasadda iyo Xeerka Hawl-gabka Shaqaalaha Dawladda

Wasiirka Shaqo gelinta, arrimaha bulshada iyo qoyska iyo Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa saaka furay shir lagaga hadlayay qabyo-qoraalka siyaasadda iyo xeerka hawl-gabka shaqaalaha dawladda oo samayntiisa ay hagaysay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu. Shirkan waxa ka soo qayb galay Wasiirka Wasaaradda Shaqo Gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska, Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta, Wasiirka Wasaaradda Deegaanka, Wasiirka Wasaaradda Difaaca, Wasiir ku Xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo Guddoomiyaha Komishanka Maamul Wanaagga.

Shirkan ayaa si gaar ah loogaga hadlay xeerka iyo siyaasadda kuwaas oo u baahnaa ka hor inta aan la hor geynin gollaha Wasiirrada.



*Waqtiga ugu fiican
ee aad ka fikiri
karto qorshahaaga
hawlgabku waa
maanta.*



Shirka Ansixinta Siyaasada **MUSHAHAR BIXINTA** iyo **QAABAYNTA DARAJOOYINKA** Shaqaalaha Dawladda.

Waxa maanta ka qabsoomay hoolka shirarka ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda kulan lagu soo bandhigayo isla markaana lagu ansixinayo qabyo-qoraalka Siyaasadda Mushahar Bixinta iyo Qaabaynta Darajooyinka Shaqaalaha Dawladda.

Shirkan oo ay guddoominaysay Guddoomiye ku Xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ka soo qaybgalay qaar ka mid ah Agaasimayaasha Guud ee wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka, Wasiirka Wasaaradda Shaqo Gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska, Guddoomiyaha Komishanka Maamul Wanaagga iyo sidoo kale madax iyo masuuliyiin kale.

Intii uu shirku socday, waxa halkaa laga soo jeediyay warbixin ku saabsan qabyo qoraalka Siyaasadda Mushahar Bixinta iyo Qaabaynta Darajooyinka Shaqaalaha Dawladda.

ladda, qaybaha kala duwan ee siyaasaddu tilmaamayso, soo jeedinta qaabaynta darajooyinka shaqaalaha iyo heerka mushaharooyinka ee darajo kasta yeelanayso iyo qodobbada kale ee siyaasadda. Waxa sidoo kale laga warbixiyay heerarkii kala duwanaa ee ay soo martay samaynta siyaasaddu iyo qiimaynta la sameeyay ka hor intii aan siyaasadda la samayn.

Wasiirrada iyo madaxda kale ee halkaas ka hadashay ayaa soo dhaweeyay qabyo-qoraalka siyaasadda, iyaga oo sheegay in ay tahay wax loo baahnaa isla markaana wax wayn ka taraya dib u habaynta shaqaalaha dawladda iyo guud ahaan qarankaba, waxaanay ku baaqeen in marka Golayaasha qaranku waajibkooda ka gutaan in ay muhiim tahay in si dhakhso ah loo dhaqan geliyo.

Siyaasadda Mushahar Bixinta iyo Qaabaynta Darajooyinka Shaqaalaha Dawladda ayaa dhawaan la hor geyn doonaa Golaha Wasiirrada si ay waajibkooda uga gutaan.



PERFORMANCE

Ahmiyadda Maareynta HAWL-QABADKA iyo QIIMEYNTA SHAQAALAHU u Leedahay Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda



La socodka horumarka shaqaaluhu waxa ay ku dhiirigelinaysaa, dadaal heer sare ah oo si joogto ah kor ugu qaadaan xirfadahooda iyo aqoontoontaba



Maareynta hawl-qabadka iyo qiimeynta shaqaalahu waa qaybaha ugu muhiimsan ee guud ahaan maamulka shaqaalaha, ha noqdeen kuwa dawlaga ah ama kuwa gaarka loo leeyahay. Si kastaba ha ahaatee, waxa lagu doodi karaa in ay si gaar ah muhiimad weyn ugu leedahay hay'adaha dawladda oo xoogga la saarayo isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta.

Maareynta hawl-qabadka shaqaaluhu waxa uu ka kooban yahay dhawr arrimood oo muhiim ah, sida dejinta yoolal/ ujeeddooyin cad iyo hawl-qabadyada laga filayo shaqaaluhu in ay qabtaan, la socodka joogtada ah ee horumarkooda iyo bixinta talooyin iyo tababarro wax ku ool ah si ay uga caawiso horumarkooda. Waxa kale oo ay xoogga saartaa ogaanshaha meelaha ay shaqaaluhu ka xooggan yihiin iyo meelaha ay uga baahan yihiin horumar dheeraad ah.

Qiimayntu, waa hannaanka rasmiga ah ee lagu qiimeeyo qofka shaqaalaha ah waxqabadka uu sameeyay sannadka, iyada oo la tixraacayo shuruucda iyo xeerarka u yaalla ee hore la isula qaatay. Tan waxaa sida caadiga ah la sameeyaa sannadkiiba mar, waxaana dib u eegis lagu sameeyaa himilooyinka qofka shaqaalaha ah, waxqabadkiisa, meelaha uu ka xooggan yahay iyo meelaha uu ka liito.

Marka la eego hay'adaha dawladda, maareynta hawlqabadka iyo qiimayntu waa muhiim, sababta oo ah waxa ay gacan ka geystaan xaqiijinta in hay'adaha dawladdu ay si hufan oo wax ku ool ah u shaqeeyaan. Waxa kale oo ay ka caawinaysaa maamulka in ay ogaadaan heer-

ka waxqabadka shaqaalaha ka hor inta aanay noqon mid aan waxba laga qaban karin ama aanay dib u dhac ku keenin shaqada. Waxa kale oo ay shaqaalaha siinaysaa wixii taageero ay u baahan yihiin.

Intaa waxa dheer, maareynta hawl-qabadku waxa ay u fududaysaa hay'adaha dawladdu in ay aqoonsadaan oo ay abaalmariyaan shaqaalaha sida joogtada ah filashooyinkooda iyo hawl-qabadkoodu sarreeyo. Waxa kale oo ay kor u qaadaysaa dhiirri-galinta shaqaalaha, taas oo keenaysa korodhka wax soo saarka iyo ku qanacsanaanta shaqada.

Gabagabadii, maareynta hawl-qabadku waa mid aan laga maarmi karin oo ka mid ah qaybaha ugu muhiimsan ee maamulka shaqaalaha, hirgelinteeduna waxa ay xaqiijisaa isla xisaabtanka, daah-furnaanta, iyo horumarinta joogtada ah ee shaqaalaha, taas oo u oggolaanaysa hay'adaha dawladdu in ay bixiyaan adeegyo dadweyne oo hufan.



BOOQASHADA WEFITGA BAANKA ADDUUNKA EE SOMALILAND



Ujeedooyinka barnaamijka dib u habaynta Shaqaalaha Dawladda, gaar ahaan, xeerka iyo siyaasadda hawlgabka Shaqaalaha Dawladda iyo siyaasadda mushahar bixinta iyo Qaabaynta Derajooyinka shaqaalaha dawladda



Dawladda Somaliland ayaa kulamo la qaadatay dhamaadkii bishii July, 2023 wefti ka socday Baanka Adduunka. Waftigaas oo u socday in ay indho indheeyaan halka uu marayo iyo waxyaalaha ka qabsoomay barnaamijka Dib u habaynta Shaqaalaha Dawladda, gaar ahaan xeerka iyo siyaasadda hawlgabka Shaqaalaha iyo siyaasadda mushaar bixinta iyo Qaabaynta Derajooyinka shaqaalaha dawladda oo loo gudbiyay Golaha Wasiirrada si ay u ansixiyaan.

Ansixintan ayaa muhiim u ah xaqiijinta hadafka guud ee barnaamijka dib u habaynta shaqaalaha dawladda iyo in uu sii socdo wada hadalka ku saabsan codsiga dawladda ee sii socoshada barnaamijka inta si buuxda looga xaqiijinayo ujeeddooyinka barnaamijka. Ujeeddada ugu weyn ee mashuuru waxa ay ahayd in la hirgeliyo dib u habaynta labadan hawllood iyo hirgelinta nidaamka maamulka shaqaalaha dawladda ee casriga ah, kaas oo hadda socda.

Weftigan waxa hoggaaminayay Lucy Musira iyo Gregory Kisunko (Hagayaa-sha barnaamijka ee Dhanka Baanka Adduunka) waxayna ka koobnaayeen Stephen Amayo (Sr. Khabiirka Maamulka Maaliyadda), Francis Muthuiya (Sr. Khabiirka Wax soo iibsiga), Cem Dener (Khabiirka dhanka maamulka), Felix Lawson (Sr. Hogamiyaha Kooxda ee heer Gobolka, WFACS), Nisha Maria Pinho (khabiirka arrimaha Maaliyadda), Nyabicha Omurwa Onang'o (la taliyaha maamulka dhaqaalaha), Michael Kidd (la taliyaha), Rita Obioma Ito-ro-Godfrey (Sr. Kaaliyaha Barnaamijka), Violet Tsindori Amani (kaaliyaha Kooxda), iyo Miriam Abongo (la taliyaha). Manuel Vargas (Maareeyaha barnaamijka) iyo Jana Kunicova (khabiir dhanka maamulka dawlaga ah).

Kulamada fool ka foolka ah ee waftiga oo ka qabsoomay magaalada Hargeysa, waxa ka mid ahaa kulamo ay la yeesheen Wasiirka Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska kaas oo ah Guddoomiyaha Guddida Dib-u-habaynta Hay'adda Shaqalaha Dawladda Mudane Cali Cumar Maxamed; Wasiirka Horumarinta Maaliyadda, Mudane Sacad Cali Shire; Wasiirka Qorsheynta iyo Horumarinta Qaranka, Dr. Axmed Aadan Buuxane; Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, Khaalid Jaamac Qodax; Garyaqaanka Guud ee Qaranka, Mudane Cabdisamad Maal; Agaasimaha Fulinta CSI, Mudane Cumar Qolombi; Agaasimaha Guud ee Xafiiiska Madaxtooyada, Mudane Maxamed Cali Bile iyo Qaybta Isku-dubbaridka Mashruuca (PCU).

- **Nidaamka Macluumaadka iyo Maaraynta Shaqaalaha.**
- **Siyaasada Mushahar Bixinta iyo Qaabaynta Darajooyinka**

Shirka Xubnaha Komishanka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda



**Waxa diiradda lagu
saaray sidii loo xoojin
lahaa wax soo saarka
iyo horumarinta
Hay'adda Shaqaalaha
Dawladda.**



Shirkii joogtada ahaa ee Guddida Sare ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa ka qabsoomay hoolka shirarka Hay'adda Shaqaalaha. Shirkaas oo uu guddoominayey Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxa goobjoog ka ahaa xubnaha guddida, Guddoomiye ku Xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda islamarkaana ah xoghayaha guddida.

Qodobadii Shirka lagu falanqeeyay waxa ay diiradda saarayaan sidii loo xoojin lahaa ka midho dhalinta iyo horumarinta Hay'adda Shaqaalaha Dawladda hiigsigeeda dhow iyo keeda fogba. Waxa sidoo kale lagu lafaguray qorshayaasha istiraatiijiyeed ee Hay'adda iyo fulinta qorshayaasha u yaalla Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

CIVIL SERVICE COMMISSION BIOMETRIC SYSTEM



The Latest Edition of



OUT NOW



 info@cscsomaliland.org  csc.govsomaliland.org
 26 June Avenue, Hargeisa - Somaliland